YOU FIRST
Screening and support for heart disease, breast and cervical cancer.

# Codsigaaga xubinnimada

Fadlan buuxi oo kusoo celi dalabkaan:
Boostada: Vermont Department of Health, 280 State Dr
Waterbury, VT 05671-8380
Fakis: 802-657-4208

*Dadka dhaga la' iyo kuwa maqalku ku adag yahay, Fadlan isticmaal adeegga gudbinta Vermont 711 oo sii lambarkeyga: 1-800-508-2222.*
*Hadaad qabto su'aalo ama u baahan tahay adeegyada tarjumaanka, wac 1-800-508-2222. Fadlan sheeg luuqadaada waxaana kugu xiri doonaa tarjumaan*

## Qeybta 1: Waxyaabaha adiga kugu saabsan

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **Magaca Hore**: | | | | |
| **Magaca Danbe:** | | | | |
| **Magaca aad rabto in ay shaqaalahaaga koowaad isticmaalan :** | | | | |
| **Taariiqda dhalashada** (bisha/maalinta/sanadka): | | | | |
| **Lambarka Sooshiyaal Sikiyuuriti** (XXX-XX-XXXX): ☐ Ma lihi Lambarka Bulshada | | | | |
| **Magac uyaalada:** ☐ Iyada /Iyada ☐ Isaga/Isaga ☐ Iyaga/Iyaga ☐ wax kale (Fadlan Sheeg): | | | | |
| **Cinwaanka Jidka**: ☐ Waqti xaadirkan ma lihi cinwaan rasmi ah | | | | |
| **Magaalada:** | **Gobolka:** | **Zip Code:** | | |
| **Cinwaanka boostada** (Haduu uusan aheyn kan sare): | | | | |
| **Cinwaanka iimeylka:** | | | | |
| **Lambarka taleefoonka:** (_____) ________ - ________________ | • Guriga | • Shaqada | • Telefoonka gacanta | |
| | **Ma caadi baa in aan fariin kuu reebno?** | | • Haa | • Maya |
| **Sideed doorbidaa in lagula soo xiriiro?** | • Taleefan | • Iimeyl | • Boosto | |

| | |
|---|---|
| **Ma waxaad tahay qof kas soo jeeda Laatiino ama Hisbaanik?** | • Haa • Maya ☐ Kama jawaabayo |
| **Waa maxay qoomiyadda aad isku taqaanaa? (sax saar dhammaan kuwa khuseeya)**<br>• cadaan<br>• Madow Afrikaan Ameerikaan<br>• Aasiyaan ama Aasiyaan Ameerikaan<br>• Dhalad Hawaii ama Jasiiradaha Baasifigga | • Dadka waddanka loogu yimi, Hindida Ameerikaanka, ama Dhalad Alaska<br>• Ma garanayo/Ma hubo<br>• Kama jawaabayo<br>• Wax kale (fadlan sheeg): |
| **Waa maxay luuqadda aad doorbiddo ee xiriirka qoraal ahaan iyo hadal ahaanba?** | |
| • Ingiriisi<br>• Isbaanish<br>• Carabi<br>• Faransiis | • Nibaali<br>• Soomaali<br>• Kirundi<br>• Wax kale (fadlan sheeg): |
| | |
| **Miyaad u baahan tahay inaanu ku soo wacno iyadoo tarjumaan uu na weheliyo?** | ☐ Haa ☐ Maya |
| **Waa maxay heerka u sarreeya ee aad waxbarashada ka gaartay?**<br>• K hooseeya fasalka 9aad<br>• Dugsi sare waxbaa ka dhigtey<br>• Dugsiga sare ama wax udhigma ayan ka qalanjebiyey | • Kuliyad ayan wax ka dhigtey<br>• Waxan dhameeyay kuliyad<br>• Ma garanaayo/Ma hubo wax udhigma<br>• Kama jawaabayo |
| **Ma isku taqaan inaad tahay qof ah LGBTQ+? (khaniisad, khaniis, lab-dheddig, ninow-naag, queer)** | ☐ Haa ☐ Maya ☐ Kama jawaabayo |
| **Ma leedahay xaalad ama naafonimo caafimaad oo jireed, maskaxeed, barasho, ama shucuureed?** | • Haa ☐ Maya<br>• Kama jawaabayo |

*Barnaamijka You First wuxuu dadka warsadaa macluumaadka shakhsiyeed ee ku saabsan qoomiyadda, isirka, waxbarashada, aqoonsiga jinsiga, naagnimada iyo ninimada, naafonimada, iyo luuqadda si uu u hubiyo inaanu gaarayno dhammaan dadka reer Vermont ee barnaamijka u qalma. Jawaabahaagu aad ayey shaqada uga caawinayaan kooxdeena si loo yareeyo kala-duwanaanshaha laga baaqsan karo ee natiijooyinka caafimaadka, laakiin waxaad dooran kartaa jawaabta 'kama jawaabayo'.*
*doorashada jawaabta.*

YOU FIRST
Screening and support for heart disease, breast and cervical cancer.

## Qeybta 2: Dakhliga

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Wadarta dakhliga qoyska cashuurta kahor** : $ | | | |
| ☐ Sanad kasta | ☐ Bil kasta | ☐ todobaad kasta | ☐ Todobaad kale oo kasta |
| **Wadarta tirada dadka dakhligan ku nool :**<br><br>(Ku dar naftaada, lammaanaha, carruurta, ama cidda kale ee ku nool dakhligan) | | | |

## Qeybta 3: Caymiska Caafimaadka

| | |
|---|---|
| **Ma leedahay caymis caafimaad?**<br>• Haa, waan leeyahay caymis caafimaad.<br>• Maya, ma LIHI caymis caafimaad hadda | |
| **Hadday haa tahay, fadlan buuxi hoos:** | |
| Magaca shirkadda caymiska: | Taariikhda caymintu bilaabantay: |
| Magaca cidda caymiska leh: | Lambarka caymiska ama aqoonsiga: |
| Lambarka kooxda ama xisaabta: | |

## Qeybta 4: Taariikhda Caafimaadka

| | | |
|---|---|---|
| **Ma leedahay, ama lahayd kansarka naasaha ama marinka siilka ?** | • Haa | • Maya |
| **Ma leedahay dhakhtar ama bixiye daryeel caafimaad ?** | • Haa | • Maya |
| Hadey haa tahay: | Magaca xafiiska:<br>Goobta xafiiska (magaalada): | |
| Hadday maya tahay, ma u baahan tahay inaad hesho dhakhtar? | • Haa | • Maya |
| | | |

| | |
|---|---|
| **Goorma aey ahayd baaritaankaagii u dambeeyey ee Pap ama HPV?** | • Waligay ma marin baaritaanka Pap/HPV<br>• Waxaan maray hysterectomy |
| Taariikhda:<br>Goobta: | ☐ Taariikhda ma hubo |
| **Ma leedahay walaacyo marinka siilka ah ama baaritaano dhawaa oo Pap ama HPV ah oo wax qaldan yihiin??** | • Haa<br>• Maya |
| **Goormee kugu danbeysay mammogram?** | • Waligey ma marin mammogram<br>• Waxaan marey mastectomy |
| Taariikhda:<br>Magaca Isbitaalka: | ☐ Taariikhda ma hubo |
| **Ma jiraan, isbaddalo, walaacyo naasaha ah, ama mammogram-ka oo dhawaan sheegay natiijo sheegaysa in cillad jirto?** | ☐ Haa ☐ Maya |
| **Ma isticmaashaa nooc uun ka mid ah tukaabada (sida sigaarka, saakarrada, ama sigaarka elektarooniga ah)?** | • Haa<br>• Maya<br>• Kama jawaabayo |
| Hadday haa tahay, ma kuu gudbin karnaa 802Quits adiga? 802Quits waxay kugula soo xiriiri taleefan waxayna kuu dhaafi farriin hadday ku heli waayaan. . | • Haa<br>• Maya |
| **Sideed ku heshay You First ?**<br>• Waxaan hore uga ahaan jiray xubin<br>• Saaxibi ama qaraabo<br>• Onlayn ayaan ka baaray<br>• Xayeysiin onlayn ah<br>• Xarunta Kibirka ee Vermont | • Dhakhtar, kalkaaliso, rug caafimaad (sheeg):<br>• Boostar ama xogside<br>• Facebook ama warbaahinta bulshada<br>• TV ama raadiyow<br>• Wax kale (sheeg): |

YOU FIRST
Screening and support for heart disease, breast and cervical cancer.

## Qaybta 5: Oggolaanshaha Xubinta — Xuquuqda iyo Waajibaadka

Saxeexidda dalabkan, waxaan oggolaanayaa inaan iska diiwaangaliyo barnaamijka You First. Waxaan qirayaa inaan ku buuxiyey dalabkan macluumaad run ah intii aan ogahay. Waxaan awood u  siiyey You First inay adeegsan karto oo wadaagi karto macluumaadka caafimaadkayga.

Waxaan awood u siiyey dhakhtarkayga, rugta caafimaadka, isbitaalka, shaybaarka, iyo barnaamijyada habnololeedka inay la wadaagaan macluumaadkayga Barnaamijka You First, si ay markaa u hubin karaan inaan helo daryeel tayo leh oo markaa You First ay u bixin karto qaanta caafimaadkayga ee aan u qalmo in la iga bixiyo.

Waxaan awood u siiyey You First inay la wadaagto macluumaadka caafimaadkayga ee ku saabsan baaritaanka kansarka naasaha iyo marinka siilka, baaritaanka waxyaalaha horseedi kara cudurka wadnaha, iyo natiijada iyo daryeelka daawaynta dhakhtarkayga, kalkaalisada, isbitaalka, rugaha caafimaadkayga, iyo bixiyayaasha daryeelka caafimaadkayga ee ku lugta leh baarista iyo daawayntayda.

You First waxa maalgaliya Centers for Disease Control and Prevention (CDC) taasi oo ka ururisa You First macluumaadka ku saabsan sida maalgalintaas loo isticmaalo. Waxaan awood u siiyey You First inay la wadaagto CDC macluumaadkayga aqoonsiga laga masaxay. "Aqoonsiga laga masaxay" waxay ka dhigan tahay inaanu ilaalin doono asturnaantaada anagoo qarinayna ama ka masaxayna macluumaadka dadka kale ku garan karaan qofka aad tahay.

Waan fahamsanahay in marka aan iska diiwaangaliyo barnaamijka You First ee Waaxda Caafimaadka Vermont, aan u siinayo oggolaansho barnaamijku inuu la wadaago macluumaadka ku saabsan u qalmiddayda barnaamijyada kale ee Hay'adaha Gobolka Vermont ee Adeegyada Aadanaha (AHS) si ay iskugu dubbaridaan adeegyada.

macluumaadkayga caafimaad ee shakhsiyeed waxa la ilaalin ammaankiisa iyadoo la raacayo Kucamalfallada Asturnaanta AHS iyo dhammaan shuruucda khuseeya. Waxaan helay nuqul ah Ogaysiisk AHS ee Kucamalfalka Asturnaanta.

Waan fahamsanahay inaan xaq u leeyahay inaan ka baxo barnaamijka You First. Haddii aanan rabin inaan ka diiwaangashanaado barnaamijka, waxaan diri doonaa waraaq ama wici doonaa You First si markaa diiwaanka la iiga saaro. Fadlan warqad ku hagaaji: Vermont Department of Health, P.O. Box 70, Drawer 38, Burlington, VT 05402-0070 ama wac taleefanka Isku-duwaha Adeegyada Xubinta 800-508-2222.

**Saxeexa:** ________________________________________ **Taariikhda:** _________________

**Fadlan saxeex oo gudbi Ogaysiiska Kucamalfalka Asturnaanta ee Hay'adda Adeegyada Aadanaha ee ku lifaaqan.**

*Saxeexa dhijitaalka ah lama oggola. Fadlan kala xiriir barnaamijka You First wixii su'aalo aad qabto taleefanka 1-800-508-2222*

VERMONT

# Hay'adda adeegyada aadanaha
# Ogaysiiska dhaqangelinta xifdinta sirta

**Ogeysiiskaani wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo Juun 1-deeda 2022**

**Ogaysiiskan waxa uu qeexayaa sida macluumaadka ku saabsan caafimaadka, daawooyinka iyo khamri cabista, iyo macluumaadka kale ee shaqsiga lagu aqoonsan karo ee adiga kugu saabsan loo adeegsanaayo iyo sidii aad ku helli lahayd macluumaadkaas. Fadlan waxaad u aqrisaa si taxadar leh.**

> **WAXAA DIYAAR KUU AH ADEEGYADA TARJUMAADA OO BILAASH AH**
>
> Please tell us if you need an interpreter or other accommodation in order to read and understand this notice.
>
> Cette lettre est importante. Si vous ne la comprenez pas, apportez-la a votre bureau local pour recevoir de l'aide.
>
> Esta carta es importante. Si no la entiende, llevela a su oficina local para solicitor ayuda.
>
> Ovaj dopis je vazan. Ukoliko je nerazumljiv za vas onda ga ponesite I obratite se lokalnoj kancelariji za pomoc.
>
> Barua hii ni muhimu. Kama huielewi, ichukue, uende nayo katika ofisi yako ya karibu kwa msaada zaidi.
>
> Fadlan noo sheega haddii aad u baahantahay turjubaan ama waxyaabo kale si aad u aqriso ama u fahamto dukumentigan.


Ku dhaqanka xifdinta sirta: **Pages 1-3**

Ku Dhaqanka Guud ee Laxiriira Macluumaadka Shaqsiga Lagu Garan Karo: **Page 4**


"Anaga" waxaan nahay Hay'adda adeegyada aadanaha(AHS). AHS waxay ka koobantahay waaxda carruurta iyo qoysaska; waaxda dadka baahiyaha gaarka ah qaba, u noolaanshaha si madax banaan iyo dadka da'da ah; waaxda caafimaadka; waaxda caafimaadka xanuunada dhimirka; waaxda asluubta(xabsiyada), iyo waaxda xafiisyada helitaanka caafimaadka ee Vermont. Qandaraaslayaasheena iyo deeqbixiyayaasheena waxaa ka mid ah kuwa adeegyada siiya guud ahaan gobolka Vermont, sida xarumaha waalidka iyo carruurta, xarumaha maalinta ee dadka waaweyn iyo xarumaha bulshada ee xanuunada ku dhaca maskaxda.

Marka aan kuu qabanayno adeegyada caafimaadka iyo kan bulshada, waxaan ku weydiinaynaa macluumaad ku saabsan aqoonsiga shaqsiga(aqoonsiga shaqsiga), iyo mararka qaarkood macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan. sharciyada federaalka iyo kan gobolada waxay nooga baahanyihiin in aan xifdino macluumaadkan oo ay ku jiraan Sharciga Caymiska Caafimaad ee Federalka iyo Sharciga La Xisaabtanka ee soo baxay 1996-dii ee loo yaqaan HIPAA ("Qaanuunka Sirta").

Ogaysiiskan waxa uu kuu sheegayaa sida aan u adeegsanayno ama u wadaagayno macluumaadka caafimaadka ee laguugu aqoonsan karo iyo marka ay tahay in aan la wadaagno cid kale. wuxuu kaloo kuu sheegayaa xaquuqahaaga. Qaanuunka ayaa waxa uu qasab nooga dhigayaa in aan ku siino ogaysiiskan. sharciga wuxuu nooga baahanyahay in aan raacno shuruudaha ku xusan ogaysiiskan ee hadda dhaqangalka ah.

---

## Dhaqangelinta la xiriirta xifdinta sirta: Macluumadka caafimaadka

### 1. Macluumaad nooce ah oo ku saabsan caafimaadkayga ayay haysaa AHS?

Adiga iyo kuwa kale waxaad na siinaysaa macluumaad ku saabsan caafimaadkaaga iyo daryeelka caafimaadka marka aad dalbanaysid ama aad helaysid adeegyadeena. Tani waxaa ku jiri kara macluumaad ku saabsan xanuunada lagaa hello, naafonimadaada ama daaweyntaada. Tani waxaa sidoo kale ka mid noqon doona macluumaadka dhaqaalaha iyo biilasha.

### 2. Mcaluumaad noocee ah oo ku saabsan caafimaadka ayay AHS adeegsanaysaa ama ay la wadaagaysaa kuwa kale?

Waxaan isticmaalnaa oo wadaageynaa kaliya macluumaadka ugu yar ee lagama maarmaanka u ah caafimaadka ee shaqaalaheena ama qandaraasleyaasheena ay u baahan yihiin inay qabtaan shaqooyinkooda.

### 3. Goormee ayay AHS adeegsanaysaa ama wadaagaysaa macluumaadkayga caafimaakda?

We waxaa laga yaabaa inay u adeegsadaan ama wadaagaan macluumaadkaaga caafimaad daaweyn, lacag bixin, ama hawlgallo daryeel caafimaad oo ay ku jiraan qorshaynta adeegga iyo maamulka AHS.

Tusaale ahaan, waxaan u adeegsan karnaa macluumaadkaaga sababaha soosocda:

- Si loo go'aamiyo u-qalmitaankaaga adeegyada ama gargaarada

  Si loo abuuro loona bixiyo adeeg shaqsiyeed ama qorshooyin daaweyn.

  *Tusaale ahaan, waxaan la wadaagi karnaa macluumaadkaaga si aan u sameeyno qorshe daaweyntaada kalkaaliyeyaasha, dhakhaatiirta iyo shaqaalaha kale ee daryeelka caafimaadka ee ku daaweeynaaya.*
- Si laguu soo xasuusiyo ballamahaaga.
- Si laguugu sheego adeegyada kale taageerada ah ama daaweynta adiga iyo qoyskaaga waxtarka u noqon karta.

Si loo bixiyo kharashaadka adeegyada laguu qabtay. Tusaale ahaan, takhtarkaagu waxaa laga yaabaa inuu noo soo diro macluumaadkaaga caafimaad si aan u bixino kharashaadkii kugu baxay. Waxaan sidoo kale la wadaagi doonnaa macluumaadkaaga caafimaadka qandaraaslayaasha si ay u bixiyaan ayagoo anaga na matalaaya kharashaadkii ku baxay daaweyntaada.

• In aan fulino howlaheena oo aan maamulno barnaamijyadeena. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno una wadaagno macluumaadkaaga caafimaad si aan u hubinno in dadka ku daryeela ay ku siinayaan adeegyo tayo sare leh oo si dhakhso leh oo sax ah aad u helayso. Waxaan u isticmaali karnaa ama wadaagi karnaa macluumaadkaaga si aan u hubinnowaxaad helaysaa adeegyada saxda ah iyo sidii aad kor ugu qaadi lahayd adeegyada laguu qabanaayo.

## 4. Ma jiraan waqtiyo ay AHS adeegsanayso ama wadaagayso macluumaadkayga caafimaad iyadoo aan aniga la ila soo socodsiin?

Waxaa jira waqtiyo xadidan oo aan u isticmaalno oo aan u wadaagno macluumaadka adiga oo aan oggolaansho kaa haysan. Mararka qaar sharcigu wuxuu noo oggolaanayaa ama na farayaa taas in aan samayno. Waxaan la wadaagi karnaa macluumaadkaaga iyadoo aan oggolaansho lagu waydiisan sababahan shaqsiyadeed ee soo socda:

- Qof qoyska ka mid ah ama qof kale oo aad dooratid, oo ku habboon ka qeyb qaadashada daryeelkaaga ama bixinta daryeelkaaga.
- Si an ula socodsiino qoyskaaga ama qof kale oo mas'uul ka ah daryeelkaaga halka aad ku dambayso, xaaladaada ama geeridaada.
- Ku socota, agaasinka aaskaaga, ama baaraha caafimaad ee u baahan macluumaadka si ay u fuliyaan waajibaadkooda marka shaqsi dhinto.
- Magdhowga shaqaalaha ama barnaamijyada kale ee la midka ah.

Waxaan la wadaagi karnaa macluumaadkaaga ogolaanshahaaga la'aantiisa sababahan qaaska ah ee soo socda:

- Hawlaha caafimaadka dadweynaha sida ka hortagga ama xakameynta cudurka, ka caawinta dib u soo celinta badeecada, soo sheegista falcelinta xun ee daawooyinka, dhaawaca ama naafanimada, iyo haysashada diiwaannada muhiimka ah ee waxyaabaha sida dhalashada iyo dhimashada.
- Ujeeddooyinka cilmi-baarista, ku xaddidan xannibaadaha sharciga ee adag.
- In lala wadaago ururada ku tabaruca xubnaha iyo ku-tallaalida xubnaha jirka
- Iyada oo laga jawaabayo amar maxkamadeed ama amar maamul, amar maxkamadeed, soo saaritaan, ama habraac kale
- Booliis markii sharcigu farayo.
- In aan soo sheegno dambi ka dhacay dhismahayaga ama ka soo horjeeday shaqaalaheenna.
- Si aan u soo wargelino in uu dhacay xadgudub, ama dayac, ama shaqaaqooyinka ka dhaca guryaha kuna wargellino mas'uuliyiinta ku haboon.
- Ku socota hay'ad kormeer caafimaad oo hawlo kormeer ah marka sharcigu oggol yahay sida hubinta iyo baarista.
- Ku socota Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee dib-u-eegista u hoggaansamida ama baaritaanka cabashada iyada oo tahay dalbade ama qof ku jira Caymiska Caafimaadka Soo Galaytiga oo macluumaadkiisa uu ilaaliyo moojee xeerka 33 VSA § 2092(c).
- Si looga hortago waxyaabo khatar gelin kara qaofka caafimaadkiisa ama amniga qofka ama shicibka, ama sarkaalka xoojinta sharciga ujeeddooyinka fulinta sharciga.

In la fuliyo howlo dowladeed oo gaar ah, sida in la ilaaliyo mas'uuliyiinta dadweynaha, amniga qaranka, arrimaha militariga, iyo in la habeeyo hay'adaha ujeeddooyinka qaarkood..

- Iyada oo lala kaashanayo hay'adaha kormeerka caafimaadka hawlo sharcigu oggol yahay.
- Hay'ad kale oo maareysa barnaamij dowladeed oo bixisa dheefaha dadweynaha, oo ku saabsan u qalmanaanta ama macluumaadka isqorista, iyo in si wanaagsan loo agaasimo iskuduwida, maamulida iyo maareeynta barnaamijyada dowladda ee la xiriira.

Marka laga reebo sababaha lagu sheegay ogeysiiskan, ama haddii kale oo uu oggol yahay sharciga, ma adeegsan doonno ama wadaagi doonno macluumaadkaaga caafimaadka adiga oo aan oggolaansho qoraal ah lagaa haysan..

## 5. Ka waran haddii qof kale u baahdo macluumaadkayga caafimaad?

Waxaad weydiisan kartaa inaan macluumaadkaaga siinno kuwa kale, ama waxaan ku weydiisan karnaa oggolaanshahaaga si aan sidaas yeelno. Kahor intaanan macluumaadka la wadaagin, waxaa lagaa

codsan doonaa inaad saxeexdo foomka oggolaanshaha. Foomka oggolaanshuhu wuxuu noo sheegayaa macluumaadka aan la wadaagi karno, ujeeddooyinka wadaagga, iyo aqoonsiga qofka (dadka) aan la wadaagi doonno. Waad joojin kartaa ogolaanshahaaga wakhti kasta.

**6. Ma dhici kartaa in aan doorto qof aniga i matalaaya?**

Haddii aad qof siisay awood qareen oo caafimaad ama haddii qof uu yahay ilaaliyahaaga sharciga ah, qofkaasi wuu isticmaali karaa xuquuqahaaga wuxuuna sameyn karaa xulashooyinka ku saabsan macluumaadkaaga caafimaad. Waxaan hubin doonnaa inuu qofku leeyahay awooddan oo uu kuu matali karo ka hor intaanaan qaadin wax talaabo ah.

**7. Ma awoodi karaa in aan arko macluumaadkayga caafimaadka?**

Xaaladaha badankood, waad arki kartaa macluumaadkaaga caafimaad. waa in aad weydiisataa taas sarkaalka qaabilsan xafidaada sirta qaab qoraal ahaan, si aad u aragto ama aad u hesho nuqul ka mid ah(waxaad eegtaa boga macluumaadka xiriirka bogga 3aad) Waxaan ku siin doonnaa nuqul ama soo koobis kusaabsan caafimaadkaaga iyo diiwaannadaada sheegashada, badiyaa 30 maalmood gudahood laga bilaabo codsigaaga.4). Waxa kale oo aad codsan kartaa nuqullo elektiroonig ah oo macluumaadka aan gacanta ku hayno elektiroonig ahaan. Nabdoonaanta ama sababaha kale ee sharciga ayaa xadidi kara macluumaadka aad aragto. Waxaan ku dallaci karnaa xaddi macquul ah oo nuqul ah.

**8. Ma badali karaa macluumaadkeyga caafimaad?**

Haddii aad u malaynayso in qaar ka mid ah macluumaadkaaga caafimaad ee ku jira diiwaankaaga inay khaldan yihiin, waxaad qoraal ku weydiisan kartaa inaan saxno ama ku darno macluumaad cusub. Waxaad weydiisan kartaa in aan u dirno macluumaadka saxda ah ama macluumaadka cusub kuwa kale ee helay macluumaadkaaga caafimaad annaga.Ma sameyn karno isbeddelada ama ku soo darista haddii fikradeheenna ay macluumaadku mar horeba sax yihiin oo dhammeystiran yihiin ama sababo kale awgood. Haddii aanaan ogolaan in la beddelo macluumaadkaaga, waanu kuu sheegi doonaa, gudaha qorista badanaa 60 maalmood gudahood, sababta aynaan ogolaan. Waxaan sidoo kale ku xusi doonnaa diiwaankaaga inaad na weydiisatay inaan baddalno macluumaadkaaga iyo inaanan oggolayn inaan beddelno.

**9. Ma weydiisan karaa AHS in ay xaddido sida ay u adeegsato una wadaageyso macluumaadkeyga caafimaad?**

Waxaad weydiisan kartaa inaan xaddidno sida aan u isticmaalno oo aan u wadaagno macluumaadkaaga caafimaad. Codsigaagu waa inuu ahaadaa mid qoraal ah oo nooga sheeg xaddidaadda aad rabto. Waan tixgelin doonaa codsigaaga laakiin naloogama baahna inaan oggolaanno.

**10. Ma codsan karaa in AHS in ay igula soo xiriirta si qarsoodi ah?**

Waxaad weydiisan kartaa inaan kuula soo xiriirno qaab macquul ah oo macquul ah ama meel kale. Codsigaagu waa inuu ahaadaa mid qoraal ah oo noo sheeg meesha iyo sida aan kula soo xiriiri karno. Waxaan isku dayeynaa inaan xushmeyno dalabkaaga.Haddii aad noo sheegto inaad ubaahantahay isgaarsiinta kale si looga hortago shaacinta macluumaadka qatar gelinaya, waan xushmeyn doonnaa codsigaaga.

**11. Ma heli karaa liis goorta ay AHS la wadaageyso macluumaadkeyga caafimaad qof kale?**

You Waxaa laga yaabaa in aan weydiisto xisaabinta shaacinta macluumaadkaaga caafimaad annaga annaga lix sano ka hor taariikhda aad codsatid, cidda aan la wadaagnay iyo sababta .. Waa inaad codsi qoraal ah u gudbisaa sarkaalka qaabilsan xafidaada. Sharcigu nagama doonayo inaan liis garaynno xaalad kasta oo aan wadaagnay macluumaadkaaga. Tusaale ahaan, maahan inaan liis gareyno waqtiyada aan wadaagnay macluumaadkaaga daaweynta AHS, lacag bixinta ama hawlgallada daryeelka caafimaad ama markii aan wadaagnay macluumaadkaaga iyadoo la raacayo oggolaanshaha aad adigu saxiixday.

**Mala ii sheegi doonaa haddii ay dhacdo in la jabsado xoggaha sirta iyo ammaanka macluumadkayga caafimaadka**

Waxaan kugu soo ogaysiin doonaa qoraal ahaan haddii uu jiro weligii jebinta macluumaadkaaga caafimaad. Jebinta ayaa dhacda marka qof aan macquul aheyn uu arko, adeegsado ama shaaca uga qaado macluumaad caafimaad oo ilaalin qaab u dhimaya asturnaanta ama amniga macluumaadka caafimaadka. AHS waxay adeegsaneysaa qodobbada qiimeynta halista ee lagu qeexay Xeerka Qarsoodiga si loo go'aamiyo bal in macluumaadka lagu xadgudbay.

**13. Maxay yihiin shuruudaha xifdinta xogaha oo ay raacayso AHS ee quseeya macluumaadkayga caafimaadka**

Waxaan raacnaa Sharciga Caymiska Caafimaad ee Maaraynta Caymiska Caafimaadka iyo La Xisaabtanka ee 1996, oo loo yaqaan HIPAA. Waxaan sidoo kale raacnaa sharci kasta oo federaal ama gobol ah oo ku siinaya ilaalinta xogahaaga ee ay ku xadidnayn HIPAA, mar alla markii ay dalbadaan. Tusaale ahaan, waxaan raacnaa sharciga qarsoodiga ee dowladda ee ku saabsan barnaamijyada daaweynta daawooyinka, 42 CFR Qeybta 2, sharciyada qarsoodiga ee gobolka ee la xiriira diiwaannada caafimaadka dhimirka,18 VSA § 7103 iyo 33 VSA § 2092(c).

**14. Ma helli karaa nuqu ka mid ogaysiiskan?**

Haa, waxaad xaq u leedahay nuqul ka mid ah ogeysiiskan. Waad waydiisan kartaa nuql ka mid ah waqti kasta. waxaadna qaab elektaroonig ah uga helli kartaa sidoo kale website-keena, WWW.ahs.state.vt.us. www.humanservices.vermont.gov

**15. Malaga yaabaa AHS in ay wax ka badasho dhaqangelinteeda xifdinta xogaha?**

Waxaan xaq u leenahay in aan wax ka badalno habka aan u maarayno xifdinta xogaha iyo ogaysiiskan. isbadal walba oo ana samayno waxa uu saamayn ku yeelan doonaa maclumaadkaaga ee aan horey u haynay iyo macluumaadka kale ee aan kaa helli doonno. isbadal walba oo aan ku samayno waxaan soo gellin doonnaa Website-keena. www.humanservices.vermont.gov, Waxaanna kuugu soo diri doonnaa boostada

**16. Yaan kala xiriirayaa haddii aan wax su'aalo ah ka qabo ogeysiiskan?**

Fadlan la xiriir **sarkaalka qaabilsan xifidinta xogaha** adigoo wacaaya 802-241-0225, ama Iimaylka: AHS.PrivacyAndSecurity@vermont.gov, ama cinwaankan:

AHS Privacy Officer
c/o Agency of Human Services
Office of the Secretary
280 State Drive – Center Building
Waterbury VT 05671-1000

**17. Sideen cabasho u gudbin karaa haddii aan aaminsanahay xaquuqdayda xifdinta sirtayda lagu xadgudbay?**

Waxaad uga caban kartaa Sarkaalkeena qaabilsan xifidinta xogaha qoraal ama taleefan. Waxaad sidoo kale u caban kartaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga, DHHS, Dhismaha federaalka ee JFK qolka 1875, Boston, MA 02203, Ama waxaad wacdaa 1-800-537-7697, Ama booqo: **https://www.hhs.gov/hipaa/filing-a-complaint/index.html**

## Dhaqangellinta xidinta xogaha ee la xiriirta, macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo

Marka lagu daro dhaqamada xifidinta xogaha ee macluuumaadka caafimaadka, AHS waxaa u degsan tilmaamo la xiriira xifdinta xogaha macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo kuwaas oo naga hella faa'idooyinka iyo adeegyadeeena

### Waa maxay macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo?

Kani waa macluumaad ay abuurtay ama heshay AHS ama kuwa u shaqeeya ama deeq bixiyaasha tilmaamaya, ama si macquul ah u aqoonsan kara, shaqsi ka hela ama ka faa'iideysta AHS. Tusaalooyinka cadeynta macluumaadka waa:

- Magaca
- Lambarka aqoonsiga social security-ga
- Taariikhda dhalashada
- Cinwaanka guriga
- Taleefan Lambarka

### Goorma ayay AHS la wadaagi doontaa ama shaaca ka qaadi doontaa xogtayda aqoonsiga iyadoo aan fasax la i weydiisan?

Waxaan la wadaagi karnaa ama shaaca ka qaadi karnaa macluumaadkaaga aqoonsiga maamulka barnaamijkeena anagoo aan ku weydiisan oggolaansho. Maamulka barnaamijka waxaa loola jeedaa howlaha loo baahan yahay in lagu qabto howlaha AHS waxayna ka kooban yihiin waxyaabaha soo socda:

- Abuuritaanka u-qalmitaanka iyo baaxadda adeegyada iyo kaalmaynta aad codsatay, oo ay kujirto aqoonsiga iyo isku-dubbaridka adeegyadan oo ka dhex dhaca AHS iyo qandaraasleyaasheeda iyo deeq-bixiyeyaasha..
- Qorshaynta, bixinta, diyaarinta, maalgelinta ama bixinta adeegyada iyo kaalmaynta shaqsiyaadka iyo qoysaska.
- Iskuduwida faa'idooyinka
- Ka hortagida khiyaanada iyo xadgudubka.
- Ku lug lahaanshaha xakamaynta tayada iyo howlaha horumarinta.
- Ka jawaabida xaaladaha degdega ah iyo gargaarka masiibo
- U hoggaansanaanta sharciga dawladda dhexe iyo kan gobolka, warbixinnada iyo shuruudaha maalgelinta marka laga tago in AHS ay ka mamnuuc tahay inay la wadaagto macluumaadka ku saabsan dalbadaha ama qofka ku jira Caymiska Caafimaadka Soo Galaytiga dawlada Maraykanka.

### Goorma ayay AHS u baahan doontaa oggolaanshahayga ka hor inta aanay wadaagin ama shaaca ka qaadin macluumaadkayga aqoosniga?

Waxaan u baahan nahay ogolaanshahaaga oo qoraal ah si aan ula wadaagno ama u siino macluumaadkaaga si:

- Tixgeli u qalmidaada adeegyada aan ka aheyn kuwa aad horey u dalbatay.
- Isku duwidda adeegyadaada lagala xiriiraayo dhakhtarkaaga oo aan naga haysan qandaraaska ama aan deeq naga hellin anaga.
- La tashiga xirfadlayaal ka baxsan AHS si aad uga faa'iideysato khibradooda.
- La wadaagida dadka aad dooratay.

Haddii aadan siinin oggolaansho xaaladahan aan kor ku soo xusnay, ma awoodi doono in aad naga hesho tayada iyo tirada adeegyada oo dhamaystiran kuwaas oo aad adiga helli karto.

---

**Wargellin ***

* Bixiyeyaasha Daaweynta Tooska ah waxay sameynayaan dadaal wanaagsan si ay u helaan aqoonsiga qofeed ee shaqsiga ee ogeysiiskaan. Haddii aan la heli karin qirasho, bixiyaha waa inuu diiwaangeliyaa dadaalkiisa ama dadaalkeeda si loo helo qirashada iyo sababta aan loo helin.

Waxaan halkan ka qirayaa in la I siiyay nuqul ka mid ah ogaysiiskan

Taariikhda: ____________________ __________________________________________
(Saxiixa shaqsi ama saxiiixa wakiil shaqsiyeed)

__________________________________________
(Qor Magaca qofka ama wakiilka shaqsiga)